

In ka badan 3.2 malyuun oo qof ayaa ku jira Xiisad bina-aadamnimo Soomaaliya: Gurmada Bina-aadamnimo Si Xun Uga Sii Daraya

Masiibada bina-aadamnimada ee ka soo shaac baxaysa Soomaaliya waa mid ka mid ah kuwii ugu xumaa ee ka dhacay adduunka. Heerka, baaxadda, iyo dhaqsaha ay xiisaddu uga sii daraysaa waxay keenaysaa fajac. Lixdii bilood ee sannadkan ugu horreeyey, tirada dadka u bahaanaa gargaar hab-nololeed gurmada ah iyo taageero bina-aadamnimo waxay korortay 77%, iyadoo ka korodhay 1.83 oo malyuun oo qof gaartayna 3.25 malyuun oo qof, waxaana ay saamaynaysaa 43% tirada dadka dalka (Kharriidadda 1), sida ay sheegayso daraasadda Gu'ga 2008 ee hadda ay soo saartay FSAU. Heerka dhibaataada iyo saxariirka haysta dadku waa mid naxdin leh. Mid ka mid lixdii caruur ah ee ay da'doodu shan sano ka yar-tahay waxa haysa nafaqa-darro aad u xun, tiraduna way sii kordhaysaa. Heerarka nafaqa-darrada aadka u xun ee ka jira badi koonfurta iyo gobollada dhexe ee Soomaaliya waxay ka sarreeyaan 15%, oo ah heerka gurmada ee la aqbali karo ee sida caalamiga aqoonsan yahay, iyo 8 ka mid ah 20 baaritaan oo nafaqada ah oo la sameeyey lixdii bilood ee la soo dhaafay waxay sheegeen heerka ka sarreeya 20%. Tirada carruurta ay nafaqa-darro aad u xumi haysaa way sii kordhayso badi magalooyinka waaweyn ee koonfurta iyo gobollada dhexe ee Soomaaliya iyo dadka muddada dheer gudaha dalka ku barakacsan. Waqooyiga, oo heerarka nafaqadu ay caadi ahayd ama ay xasilloonayd marka loo eego dalka intiisa kale, xaaladda nafaqadu iminka way ka sii daraysaa.

Mid ka mid ah arrimaha ugu waaweyn ee xiisaddan sii xumaynaya waa colaadda sokeeye – taasoo sii kordhaysa oo iminka ah tii ugu xumayd ee uu dalka Soomaaliya soo maray laga soo bilaabo bururkii dawladda ee billowgii sannadihii 1990aad. Colaadda hubaysan iyo nabado-darradu way sii kordhayaan, waxayna toos u saamaynaysaa dhibaataada haysata dadka, marka la eego xad-gudubiyada xuquuqda aadamaha, rabshadaha, dilka iyo barakaca (in ka badan 870,000 oo qof ayaa gudaha dalka ku barakacsan colaadda darteed sannadkii la soo dhaafay). Hase yeeshee, saamaynta aan tooska ahayn ee colaaddu ay ku leedahay dhaqaalaha waxay abuuraysaa xiisad dhaqaale oo dheeraad ah – taasoo iminka saamayn ballaaran oo waxyeelladeedu ay badan tahay ku leh xaaladda guud ee dadweynaha iyo bina-aadamnimada.

Colaadda sii kordhaysa iyo nabdegalyo-darradu waxay abuurayaan xiisad dhaqaale, iyadoo ayna ahayn oo kaliyacaarqaladeynta howlaha dhaqaalaha, ganacsiga, iyo isgaarsiinta gaadiidka, laakiin xakamayn la'aanta dabacidda lacagta dalka oo aad u badan, taasoo sababta u weyn ee ka damaysaa ay tahay si maalgelin loogu sameeyo colaadda sii kordhaysa. Shilinka Soomaaliya ee sida cusub loo daabacay ayaa lagu hafiyeed suuqyada, taasoo degdeg u kordhisay helitaanka lacagta, keentayna in qiimaha Shilinka Soomaaliya uu aad hoos ugu dhaco, oo uu gaaray heerarkii ugu hooseeyey ee la diiwaan geliyey sarrifka lacagta. Taasi waxay keentay, in Shilinka Soomaaliya uu qiima dhacay 165% laga soo bilaabo bishii 1aad ee 2007.

Saamaynta arrimaha is biirsaday ee lacagta qiima dhacday, sida weyn ee loogu tiirsan yahay badeecadda dibedda laga keeno, sareynta qiimaha cuntada iyo shidaalka caalimi ahaan iyo kaydka iyo wax-soo-saarka beeraha dalka oo hooseeyaa waxay keeneen sicir barar aad u sarreeya oo ku yimi cuntada iyo waxyaabaha kale ee lagama maarmaanka ah. Qiimuhu wuxuu kordhay ilaa 370% intii lagu jiray lixdii bilood ee u dambeeyey, iyo ilaa 700% sannadkii la soo dhaafay gudhiisii. Tusaale ahaan, Koonfurta qiimaha haruurku/masegadu wuxuu kordhay lix laab lab iyo tobankii bilood ee la soo dhaafay, isagoo ka kordhay 2,195 gaarayna 12,970 ShSo/kg. Dadka deggan dhulka miyiga ah iyo magaalooyinka ee aanay colaaddu si toos ah u taaban, iminka waxay halgan ugu jiraan sidii ay u awoodi lahaayeen baahidooda cuntada lagama maarmaanka ah gaar ahaan dadka saboolka ah, kuwaas oo ku tiirsan suuqyada oo ay kooban tahay awooddooda ay ugu adkaysanayaan qiimaha sida degdegga ah ee weyn u kordhay. Xoola-dhaqatadu horeba halganka ugu jiray inay u adkaystaan abarta sii socota, arrimaha dhaqaalaha ee dheeraadka ah ee naxdinta leh sida qiimaha cuntada iyo biyaha ee aadka u kacay waxay keenayaan in si degdeg ah ay xaaladdu uga sii darto xagga hantida lumaysa ama khasaaraysa, fursad-u-helidda cuntada iyo xaaladda nafaqada.

'Dad ay tiradoodu sii badanayso oo deggan dhulka miyiga ah iyo magaalooyinka ayaa gelaya xaalad Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX) iyo Gurmada Bina-aadamnimo (GB)', ayay sheegtay Cindy Holleman, La Taliyaha Sare ee Farsamada u qaabilsan Qaybta Falanqaynta Hubinta Cuntada ee Soomaaliya (FSAU/FAO), 'maddaama aanay u adkaysan karin arrimaha isbiirsaday ee naxdinta leh ee ay ka midka yihiin colaadda, abarta iyo sicir-bararka aadka u sarreeya. Badi dadka saboolka ah iyo kuwa dhaqaalahoodu uu dhexdhexaada yahay way daymeysan yihiin, waxaana ay ku dhaqmayaan xeelado aad u sii xag jira oo ay ugu adkaysanayaan duruufaha jira, oo ay ku jiraan in inay dhimaan inta ay ka kooban tahay cuntada la cuno, in aanay cunto cinun wakhtiyada qaar, in qoysku is kala qaybiyo, inay iibiyaan hantidooda waxsoo-saarka leh, iyo in ay u hayaamaan deegaan kale 'Keynaan'".

Wararka oo dhammi waxay muujinayaan in arrimaha ugu muhiimsan ee saamaynta ku leh xiisadda bina-aadamnimada ayaa lagu wadaa inay sii xumaadaan bilaha soo socda. Waxa jirta baahi weyn oo loo qabo in dardar la geliyo gargaar isku xidhan oo ah gurmada hab-nololeedka iyo bina-aadamnimada ah. Iminka, fursad-u-helidda bina-aadamnimadu kuma filla inay dabooشو baahida sii kordhaysa ee bina-aadamnimada, hay'adaha gargaarka bina-aadamnimada waxay halgan ugu jiraan sugidda joogitaangood. Dilka iyo qafaalashada ama afduubidda howl-wadeennada hay'adaha gargaarka, korodhka dhaqdhaqaaq howleedka ciidan iyo malayshiyoyin, iyo haddidaadaha lagu hayo bulshada waxay aad u sii adkaynaysaa jawaab-celinta bina-aadamnimada waxaana ay keentay in qaar ka mid ah howlaha gargaarka is dhimaan ama joosadaan koonfurta iyo gobollada dhexe. Fursad-u-helidda bina-aadamnimadu hoos ayay u dhacaysaa iyadoo aan weli la fulin baahida sii kordhaysa.


'Colaadda sii kordhaysa, nabadgelyo-darrada, dagaalka sokeeye, iyo xasillooni darida hadda ka jirta Soomaaliya waxay sii kordhinaysaa khalkhal dhaqaale kaas oo bilaabaya ku yeelashada saamayn balaaran oo waxyeello weyn ku yeelatay bulsho balaadhan', ayay tidhi Cindy Holleman 'taasoo halis ku haysa in dalku uu galo masiibo xagga bina-aadamnimada oo xitaa tan ka sii weyn'.

Si aad u hesho xog kale, eeg: www.fsasomali.org, ama la soo xiriir FSAU: fsauiinfo@fsau.or.ke.

Cimilada
Suuqyada
Nafaqada
Beeraha
Xoolaha
Arrimaha Gobolka ee Soo Shaacbaxaya

Cinwaanka:
FSAU - Somalia
Kalson Towers,
Parklands
Box 1230 Village Market
Nairobi, Kenya
Tilifoonka:
+254 20 374 5734
Faakiska:
+254 20 374 0598
Email:
fsauiinfo@fsau.or.ke
www.fsasomali.org

Falanqaynta Xaaladda Kala Qaybinta Sugnaanta Cuntada ee Soomaaliya: Dadka Bara Kacay, Miyiga iyo Magaalo July - December '08



Food Security Analysis Unit - Somalia <http://www.fsasomali.org>



P.O. Box 1230 Village Market, Nairobi, Kenya Email: fsauno@fsau.or.ke
 Tel: 254-20-3745734 Fax: 254-20-3740598

FSAU is managed by FAO.
 The boundaries and names on these maps do not imply official endorsement or acceptance by the United Nations.
 The regional & District boundaries reflect those endorsed by the Government of the Republic of Somalia in 1996.

